



Somali

**Billow Cusub oo loogu talagalay
Dugsiga Hoose ee Amherst (Amherst
Primary School)**

Wada tashi
Maajo 26- Juun 30 2004

Billow Cusub (Fresh Start) oo loogu talagalay Dugsiga Hoose ee Amherst

Tusmooyinka

Sidee loo isticmaalaa buuggaan yar	2
Hordhac	3
Goobta Qorsheynta iyo Dugsiga Hooes ee Amherst 4	3
Billow Cusub oo loogu talagalay Dugsiga	5
Miyey jiraan wax lagu beddesho Bilow Cusub?	6
Tallaabooyinka Xiga	6
Jadwalka waqtiga ee la soo jeediyey	7
Taariikhaha Kulannada Wada Tashiga	8
Tusmo kooban	8
Lifaaqa 1	Taxanaha Wada Tashiga
Lifaaqa 2	Marxaladaha Furaha 1 iyo 2 Cabbirka Kor u Qaadidda Natiijooyinka iyo Dugsiga.
Lifaaqa 3	Deegaanka La Qorsheynayo 4. Taxliilaadka goobaha iskuulka.
Codsiga loogu talagalay foomka turjumidda	
Foomka Jawaabta	

Sidee loo isticmaalaa buuggaan yar

Buuggaan yar wuxuu sheedda ka tilmaamayaa isbeddello dhowr ah oo suuragal ah oo lagu sameynayo Dugsiga Hoose Amherst. Waxay ula jeeddadiisu tahay in lagu siiyo warar ku saabsan doorrimaadyada la heli karayo, iyo in lagu siiyo fursad aad noogu sheegtid waxa ay kula tahay.

Buuggaan yar waxaa ku jira

- Sharraxaadda arrimaha saameynaya iskuulka
- Sharraxaadda waxa Billow Cusub (Fresh Start) ay iskuulka ugu deeqi karaysay
- Foom jawaab adiga laguugu talogalay si aad u buuxisid aadna noogu soo celisid, adigoo na ogeysiinaya aragtiyadaada

Kulanno badan oo loogu talogalay waalidiinta/daryeeleyaasha iyo dadweynaha guud ayaa la isku duwi doonaa si gacan loo siiyo wada tashiga isla markaana faah faahinta kuwaan ayaa lagu soo daray.

Fadlan buuggaan yar si taxaddar leh u akhri, maadaama uu sharraxayo sababta aan wada tashiga uga yeelaneyno doorrimaadyada Billow Cusub oo loogu talogalay iskuulka, iyo saameynta xun ee suuragalka ah ee is beddello kasto ay keeni karaan.

Fadlan xogwareysigaaga oo dhammeystiran u soo dir

Lyn Baran

Kooxda Qorsheynta Goobta Iskuulka (School Place Planning Team)
Xarunta Barashada iyo Farsamada Hackney (Hackney Technology and Learning Centre)
1, Reading Lane
Hackney E8 1GQ

Dokumentigaan, xogwareysigaan iyo foomka jawaabta waxaa sidoo kale lagu helayaa khadka-shidan iyadoo la booqanayo shabakadeenna.

www.learningtrust.co.uk

Email ku soo dir wixii faallo ah ama xogweydiin ah

lyn.baran@learningtrust.co.uk

0208 820 7183 or 7629

Maalinta ugu danbeysa jawaabuhu waa **30-ka Juun 2004**.

Nuqullada dokumentiga oo dhammeystiran waxaa lagu helayaa luqadaha soo socda Turki, Isbaanish, Bengali iyo Yoruba.

Hordhac

Hackney waa Deegaan magaalo oo gudeheeda ifaayo oo leh shacab kala duwan oo dhaqaaqaya. Sidoo kale waa meel arday fara badan ay la kulmayaan faa'iido la'aan kala duwan. Tani waxay mid aad muhiim u ah ka dhigeysaa in ardayda Hackney ay awoodaan iney ku raaxeystaan waxbarashadooda iskuullo xooggan oo guul leh.

Iskuullada oo dhan waxaa si joogto ah u kormeera Xafiiska Dowladda ee loogu talagalay Heerarka Waxbarashada (Ofsted) si loo xaqiijiyo in carruurta ay u noqdaan kuwo hela waxbarasho heer wanaagsan.

Dugsiga Hoose ee Amherst wuxuu hadda leeyahay arday dhan 415 oo ku qoran – 90% oo ka soo jeeda kooxaha haybta tirada yar; 25.8% ay leeyihiin baahiyada waxbarasheed ee gaarka ah iyo 52% xaq u leh cunto iskuul oo lacag la'aan ah.

Markay ahayd Abriil 2003 Ofsted waxay kormeertay iskuulka isla markaana waxay soo qaadday wel wello badan taasoo u baahday in iskuulka la dhigo cabbirro gaar ah. Tan waxay micnaheedu noqotay iskuulku inuusan awoodin inuu bixiyo heer waxbarasheed la aqbali karo oo ardaydiisa loogu talagalay.

Marka iskuulka la dhigo cabbirro gaar ah, Hay'adda Waxbarashadu (Learning Trust) waa iney tallaabo qaaddo si ay wax uga qabato dhibaatooyinka ay kormeereyaashu cayimeen, iyo iney tixgelin siiso dhammaan doorrimaadyada loogu talagalay mustaqbalka iskuulka.

Warqaddaan wada tashigu waxay sheedda ka tilmaameysaa aragtiyadeenna ku saabsan hab horey loogu tallaabsanayo oo loogu talagalay iskuulka isla markaana waxay kugu casuumeysaa inaad ka soo faallootid.

Dugsiga Hoes ee Amherst iyo Goobta Qorsheynta 4

Dugsiga Amherst waa dugsi hoose oo mujtamac oo ballaaran oo ku yaal wadnaha deegaanka oo ku yaal Waddada Sigdon, E8 1AS. Iyadoo loogu talagalay ujeedooyinka qorsheynta, goobtaan waxaa loo yaqaanaa Goobta Qorsheynta (Planning Area 4). Iskuulku wuxuu awoodaa inuu bixiyo goobo loogu talagalay ilaa iyo 525 arday oo da'doodu tahay inta u dhexeysa 5 iyo 11 iyo 50 meelo waqtiga badhkii oo ku yaal xannaanada.

Iyadoon la mid ahayn goobaha kale ee Degmada, goobtaan ma lahan meelo siyaado ah oo ku filan oo lagu hayo iskuullada deegaanka. Xiridda Amherst waxay ka tegeysaa farqi u dhexeeya in ka badan 320 meelood ee Goobta Qorsheynta. Warkaan lagu dejiyey Lifaaqa 3. warkeenna ka imaanaya Xukuumadda London-ta Weyn, taasoo Hackney siis tubaha loogu talagalay tirada carruurta u muuqda iney yihiin kuwo u baahanaya good iskuul mustaqbalka, wuxuu soo jeedinayaa in shacabku uu kori doono qiyaastii 2% ilaa iyo 2008, sidaa awgeed waxaan u baahannahay inaan hananno tirada boosaska iskuulka ee aan hadda haysanno. Xiridda iskuulku u oggolaan meysa Hay'addu iney la kulanto mas'uuliyadeheeda sharciga ah si ay u bixiso boosas ku filan si ay ula kulanto baahida iyadoo ku jaan go'an goobta qorsheynta.

Wixii doorrimaadyo ah ee loogu talagalay mustaqbalka iskuulku waa iney bixiyaan boosas loogu talagalay dhammaan carruurta hadda ku qoran Dugsiga Hoose ee Amherst.

Maxay yihiin arrimaha haysta Amherst ?

Dugsiga Hoose ee Amherst wuxuu dhowr sanadood ku soo jiray dhibaatooyin. Markii ay iskuulka kormeertay Ofsted Abriil 2003, kormeereyaashu waxay ogaadeen in iskuulku uusan arrimaha ugu muhiimsan ee shaqadiisa ku hagaagsaneyn, isla markaana ardaydiisa ma siineyn heerar waxbarasheed oo la aqbali karo. Horukaca ilaa iyo markii la sameeyey kormeerkii ugu danbeeyey Oktoobar 1997-dii wuu liitay, isla markaana arrimihii ugu muhiimsanaa ee la cayimay midkoodna waxba lagama qaban. Iskuulka waxaa lagu xukmiyey inuu yahay mid bixiya lacag qiimo liidata, sidaa darteedna wuxuu u baahday cabbirro gaar ah. Warbixintaan waxaa laga helayaa shabakadda Ofsted – www.ofsted.gov.uk.

Meelaha ugu muhiimsan ee wel welku ka jiray waxay ahaayeen:

- Heerarka maaddooyinka oo dhan, marka laga reebo sayniska iyo aqoonta diinta ee Sanadka 2, waxay ahaayeen kuwo si aad ah uga hooseeya cel celiska caadiga ah isla markaana ardaydu horukac ku filan ma aysan ka sameynin waxbarashadooda, gaar ahaan Ingiriiska iyo xisaabta guud ahaan iyo sayniska Sanadka 6.
- Waxbariddu guud ahaan waxay ahayd mid liidatay.
- Hoggaaminta iyo maamulku waxay ahaayeen kuwo aan miro dhal ahayn dhinaca xaqiijinta kor u qaadidda.
- Manhajka la bixiyey waxaa ku jiray qaladaad gaar ahaan dhinaca horumarinta xirfadaha aasaasiga ah.
- Horumarinta ardayda ee dhinaca dhaqan ahaaneed, niyad ahaan, bulsho iyo shucuur ahaanba waxay ahayd mid liidata.
- Xaadiridduna waxay ahayd mid liidata
- Akhlaaqada ardaydu guud ahaan way liidatay, laakiin waxay si gaar ah ugu sii liidatay casharrada marka wax bariddu ay noqotay mid aan juhdi lahayn.

Waxaa wel wellada ay Ofsted kaga dhawaajisay sii dheer, in iskuulka ay dhowaanahaan ku adkaatay shaqaale u carbinta iskuulka, iyo miisaaniyadda iskuulka oo keentay caqabado la taaban karo.

Iyadoo daba socota kormeerkii Ofsted, iskuulku wuxuu horumariyey Qorshe Wax qabad oo dejinaya sida uu u qorsheyn doono inuu kor ugu qaado meelahaan uu wel welku ka jiro. Iyadoo la shaqeyneysa iskuulka, ayey Hay'adda Waxbarashadu dhaqaaq gelisay taxane wax qabad ah si ay iskuulka u xasiliso, isla markaana u xaqiijiso in qaabka iyo hawshaba loo meel dhigay si iskuulka looga saaro cabbirrada gaarka ah. Kuwaan waxaa ku jiray ku taageeridda iskuulka shaqaale khibrad leh oo da'a weyn, siinta barnaamij tababar iyo talobixin, iyo taageero uga timaadda kooxda talobixinta, la taliyeyaal xisaabin iyo aqoonba, kooxda guul gaaridda haybta tirada yar iyo shaqaale lagu xiray Aagga Wax qabadka Waxbarashada (Education Action Zone).

Miyuu wax soo saarku soo hagaagay ilaa iyo intii kormeerka la sameeyey ?

Natiijooyinka Marxaladda Furaha ah ee 1 iyo Marxaladda Furaha ah ee 2 ee 2003 waxay ahaayeen kuwo liita, waxayna ka hooseeyeen ama aad uga hooseeyeen wax soo saarka iskuullada Degmada. (Lifaaqa 2)

Markay ahayd Sebtembar 2003, iyadoo lagu aqoonsanayo caqabadaha sii socda ee uu iskuulku la kulmay, wafdigii maaliyadda ayaa meesha laga saaray isla

markaana Hay'adda Waxbarashada ayaa si aad u dhow lug ugu yeelatay kaalmeynta iskuulka si uu u maamulo miisaniyadiisa.

Markii iskuulka lagu meeleeeyey cabbirrada gaarka ah, kormeeryaasha HMI waxay booqdaan iskuulka si ay ugu kuurgalaan horukaca. Tani waxay inta badan dhacdaa xilligiiba mar.

Booqashadii u kuurgelidda ee HMI ee ugu danbeysay ee dhacday Abriil 2004, horukaca waxaa lagu xukmiyey inuu ku xaddidnaa 5 ka mid ah 6-dii arrimood ee furaha ahaa. Warbixintu waxay caddeyneysaa in shaqo miro dhal oo xoogaa ah la qabtay laakiin sidoo kale waxay tilmaameysaa inuu weli sii jiro socod dheer

Iskuulku waxaa laga yaabaa inu awoodo inuu hagaago iyadoo loo marayo meel marinta Qorshaha Wax qabad (Action Plan) ee Ofsted.. si kasta ha ahaatee, iyadoo ay jiraan caqabadaha uu iskuulku la kulmayo, aragtida Hay'adda Waxbarashadu waa in iskuulku uusan u muuqan inuu guul ka gaarayo xaddiga hagaajinta haddii uu sii wado qaabka uu hadda ku jiro

Billow Cusub oo loogu talagalay Iskuulka

Horraantii 2004, Hay'adda Waxbarashadu waxay bilowday iney wada hadal ku saabsan suuragalnimada Billow Cusub oo loogu talagalay Iskuulka la yeelato DfES.

Iskuulka waxaa la siiyey "Billow Cusub" markii uu xirmay ka dibna dib uga furmay isla goobtii. Waa doorrimaadka keliya ee iskuulka uga furan ku saleynada Ofsted ee "cabbirro gaar ah" ama "daciiftinnimo aad ah" Waxaa loo dhigay marka dhammaan doorrimaadyada kale – marka lagu daro xiritaanku – ay noqdaan kuwo aan camali ahayn. Haddii Billow Cusub la oggolaado, markaas maaliyad canshuur ka soo noqota iyo ra'sulmaalba kuwo la hel ayaa laga dhigi karaa si loo taageero iskuulka cusub. Hackney waxay khibrad miro dhal u lahayd qaabkaan, markii Rams Episcopal RC Primary uu noqday mid si Cusub loo Billaabay isagoo ah Iskuulka St John Iyo St James ee 2000.

Waxaan rumeysannahay in Billow Cusub uu ku deeqayo fursadda ugu wanaagsan ee suuragalka ah ee lagu gaarsiin karo hagaajin deg deg ah. Wuxuu bixinayaa fursad si loo sugo hoggaan xooggan oo wax ku ool ah, loo meel mariyo qaab hindiseed cusbooneysiinaya manhajka isla markaana u dheelli tiranka sii wadidda ardayda oo dhan kuwaasoo awoodi doona iney ku sii sugnaadaan isla goobtii.

Soo jeedinta Billow Cusub waxay ku saleysan tahay barnaamij horumarineed oo seddex sano ah oo loogu talagalay iskuul cusub, kaasoo uu isha ku hayn doono Qorshaha Kor u Qaadidda Guul Gaaridda. Inta uu kaasi abbaarsanayo gaarsiinta hagaajinta arrimaha ugu muhiimsan ee ay cayintay Ofsted, soo jeedinta waxaa sidoo kale ku jira qaabab kale oo kala dhig-dhigan:

- Hoos u dhigid lagu sameeyo tirada oggolaanshada marxaladaha 2 ee soo gelidda. Tan wuxuu micnaheedu noqon doonaa in ay jiri doonto 60 boos ee koox sanadeed kasta halkii ay ka ahaan lahayd 75 xilligan la joogo. Tani waxay meesha ka saari doontaa baahida waxbaridda kooxo sanadeedka isku dhafka ah.
- Maalgelin ra'sul-maal la taaban karo oo lagu sameeyo iskuulka, iyadoo la beegsanayo abuuridda fasallo ee mustaqbalka. Macallimiintu waxay heli doonaan doorrimaadyo ballaaran oo ay kala doortaan si ay u xaqiijiyaan in waxbarashadu ay tahay mid ku soo darta isla markaana kala gaar u ah dhammaan, iyadoo la isticmaalayo farsamo cusub iyo wacyi gelin maqal iyo muuqaalba leh oo ballaaran.

- Barnaamij iskaashi lala yeelanayo Dugsiga Hoose ee Mujtamaca Millfields ee caanka ah (popular Millfields Community Primary School) ee guusha leh. Tani waxay guddoonka siin doontaa horumarin deg deg ah oo loo marayo qaybsiga khibrada dhammaanka labada iskuul.

Haddii soo jeedinta Billow Cusub la oggolaado, waxay u badan tahay in ay tani meel mari doonto laga bilaabo Easter 2005.

Miyey jiraan wax lagu beddesho Billow Cusub?

Hay'adda Waxbarashadu waxay rumeysan tahay in tirada carruurta qoran awgeed, ay noqon doonto lagama maarmaan in la sii hanto dugsi hoose oo ballaaran oo ku yaal gooba Amherst. Xirid buuxda iyo dhiibidda goobtu markaa maahan wax si camali ah loo doorto.

Hay'addu ma rumeysna in wixii doorrimaad ah ee sharci ahaan iskuulka ku daraya iskuul kale oo deegaanka ah ay xukumi doonto taageerada mujtamaca. Aragtideenna, markaas, isku daridda iyo wadajirka waa in la daba gelin. Si kastaba, waxaan dooneynaa, inaan dhisno wadaag dabacsan oo lala galo iskuullada ugu guusha badan, sida Millfields.

Iskuulku wuu sii socon karaa Billow Cusub la'aan. Si kasta ha ahaatee, waxaan rumeysannahay in ifa-faalaha iskuulku uu hagaagi doono haddii si cad loo jebin karayo taariikhdiisii in dhawaale, iyo haddii maalgelin cusub loo heli karo. Is beddelladaan waxaa si aad u sahlan loo sameyn karaa iyadoon Billow Cusub la sameynin.

Iyadoo ku saleysan Hay'adda oo wada tashi ka sameyneysa marxaladdaan la joogo, doorrimaadka Billow Cusub oo keliya. Waxaan rumeysannahay tani iney tahay habka ugu wanaagsan ee horyaal iskuulka, ardaydiisa iyo mujtamaca deegaanka.

Tallaabooyinka Xiga

Hay'adda Waxbarashadu waxay soo dhaweyneysaa aragtiyadadaa ku aaddan soo jeedinta lagu dejiyey dukumentigaan wada tashiga. Hay'adda Waxbarashadu waxay tixgelin doontaa dhammaan aragtiyada la soo jeediyey waqtiga wada tashiga, isla markaana go'aan ayaa laga gaari doonaa habka ugu wanaagsan ee na horyaal.

Haddii Billow Cusub loo xukumo inuu yahay habka ugu wanaagsan ee na horyaal, lagama maarmaan ayey noqon doontaa in la daabaco ogeysiis sharci ah ee soo jeedinta. Markay sidaas noqoto waxaa jiri doona waqti dheeraad ah oo 4 toddobaad ah oo loogu talagalay wixii diidmo ama faallooyin qoraal ah oo caadi ah ee la soo diro.

Wixii diidmo ah ee ku wajahan soo jeedinta la daabacay waxaa loo diri doonaa Guddiga Ururka Iskuulka kuwaasoo go'aansan doona soo jeedinta.

Jadwalka Waqtiga la soo jeediyey

Taariikh	Wax qabadka
26 Maajo - 30 Juun	Waqtiga wada tashiga caadiga
Luulyo	Hay'adda Waxbarashadu waxay ka jawaabi doontaa wada tashiga iyo baahida loogu talagalay daabicidda soo jeedinta sharciga ah
9 Sebtembar	Daabicidda ogeysiisyada sharciga ah haddii ay habboon tahay
9 Sebt – 7 Oktoobar	Muddada afarta toddobaad ee sharciga ee loogu talagalay faallooyinka iyo diidmooyinka ku aaddan soo jeedinnada
19 Oktoobar	Guddiga Ururka Iskuulku kulan ayuu yeelanayaa si uu go'aan uga gaaro soo jeedinta.
21 Oktoobar	Guddoonka Hay'adda Waxbarashadu wuxuu go'aansan doonaa soo jeedinta, haddii aan wax ka faalloosho ah la helin muddada afarta toddobaad ee ogeysiiska sharciga ah.
Easter 2005	Iskuulk cusub ayaa la furayaa

Hay'adda Waxbarashadu waxay tixgelin siin doontaa aragtiyada lagu qeexay qoraal ahaanta iyo inta kulanka la joogo labadaba.

Faallooyinka waa in la soo diraa, **markay tahay 30-ka Juun 2004**, to:

Lyn Baran
 Qorsheynta Meeleynta Iskuulka
 Hay'adda Waxbarashada
 Xarunta Waxbarashada iyo Farsamada Hackney
 (School Place Planning
 The Learning Trust
 Hackney Technology and Learning Centre)
 1 Reading Lane
 London
 E8 1GQ

Waxaa laga yaabaa inaad doonto inaad ku soo darto faallooyinkaaga xogwareysiga ku lifaaqan. Faallooyinka waxaa kaloo laga yaabaa in ayadoo elektarooni ah iyadoo la gelayo shabakadda Hay'adda Waxbarashada www.learningtrust.co.uk ama ayadoo faakis 0208 820 7516.

Kulannada Wadatashiga

Wada tashigaan wuxuu socon doonaa laga bilaabo 26 Maajo ilaa iyo 30 Juun 2004 waxaana ku jiri doona kulannada soo socda:

Kulannada loogu talagalay waalidiinta iyo daryeeleyaasha

Talaado 22 Juun 2004 saacadda 9.15subaxnimo iyo

Arbaco 23 Juun saacadda 6.00fiidnimo goobta Iskuulka Amherst, Sigdon Road, E8 1AS

Kulanka loogu talagalay xubnaha shaqaalaha

Arbaco 9 Juun 2004 saacadda 4galabnimo goobta Iskuulka Amherst, Sigdon Road, E8 1AS

Kulanka loogu talagalay xubnaha mujtamaca

Khamiis 24 Juun 2004 saacadda 6.00 fiidnimo goobta Iskuulka Amherst, Sigdon Road, E8 1AS.

Turjumaanno ayaa la keeni doonaa kulannada loogu talagalay waalidiinta iyo mujtamaca. Taxane buuxa ee dadka lala tashanayo ayaa ku xiran isagoo sidii lifaaqa 1.ah

Nuqullada dukumentiga wada tashigaan waxaa lagu helayaa Ingiriis, Turki, Yoruba iyo Bengali. Foomka ayaa lagu soo daray loogu talagalay qof kasta oo jecel dukumentii ku turjuman luqadaha kale

Tusmo kooban


Iskuulka Amherst waa dugsi hoose ee mujtamac oo ku yaal wadnaha degmada ee Sigdon Road E8 1AS, waxaana dhigta ardayda da'doodu u dhexeyso 3 iyo 11.

Hay'adda Waxbarashada (Hay'adda) waa shirkad aan dheef sameynin oo mas'uul ka ah bixinta adeegyada waxbarashada Hackney. Hay'addu waxay la wareegtay mas'uuliyadda hawlaha xukuumadda waxbarashada deegaanka ee Hackney intooda badan waxayna kala wareegtay Waaxda Waxbarashada Hackney markay ahayd 1 Agoosto 2002. www.learningtrust.co.uk

Guddiga Uruka Iskuulka waa urur gaar ah oo lagu dhisay Sharciga Wada Shaqeynta iyo Heerarka Iskuulka ee 1998 kaasoo isu keena wadaageyaasha ugu muhiimsan ee ku jira bixinta waxbarashada deegaan ahaan. Guddiga waxaa mas'uuliyad sharci ah ka saaran tahay inuu tixgeliyo isla markaana oggolaado Qorshaha Ururka Iskuulka iyo inuu tixgeliyo isla markaana go'aansado soo jeedinnada keli ahaaneed ee ay daabacday Hay'addu ama ururka maamulka iskuulku iyadoo daba socota wada tashi. Marka la qorsheynayo is beddellada ururka iskuulka, Guddigu wuxuu ixtiraam siin doonaa mabaadii'da lagu dejiyey Qorshaha Ururka Iskuulka.

Ofsted (Xafiiska loogu talagalay Heerarka Waxbarashada) waxaa la dejiyey 1 Sebtembar 1992. Ofsted waa waax dowladeed oo aan wasaarad ahayn taasoo ujeeddadeeda ugu muhiimsan ay tahay caawinta tayada iyo heerarka waxbarashada iyo daryeelka ilmaha iyadoo loo marayo kormeer madax bannaan iyo qawaaniin, iyo talo-siinta Xoghayaha Dowladda. www.ofsted.gov.uk

HMI Kormeereyaasha Boqoradda



**Hay'adda Waxbarashada
Waxbarashada mustaqbalka Hackney**

Lifaaqa 1

Wada tashi

Waxay ujeeddadeenu tahay inaan la tashanno inta ugu badan ee dad ah iyo kooxaha daneynaya intii suuragal ah, iyo in la raaco tusiyaha ka imaanaya DfES, iyo Siyaasadda Hay'adda Waxbarashada ee ku aaddan Wada tashiga

Tan waxaa ku jiri doona

- Waalidiinta & Daryeeleyaasha Ardayda ku qoran Amherst, Shaqaalaha iyo Maamuleyaasha
- Isku Duweyaasha Fulinta ee LEA's (Islington, Haringey, Waltham Forrest, Tower Hamlets, Newham, Magaalada London) ee deriska la ah
- Madaxda iyo Guddoomiyeyaasha Maamuleyaasha Iskuullada Hackney iyo Madaxda Dugsiyada Hoose ee ku yaal degmooyinka kale ee labo mayl u jira iskuulka
- Kooxaha mujtamaca deegaanka iyo wadaageyaasha ganacsiga
- Qunsullada Hackney
- MP-yada Hackney
- Horumarinta Sanadaha Hore iyo Wadaagga Daryeelka Ilmaha
- Guddoonnada Kaniisadaha
- Isku Xirka Wadashaqeynta Mujtamaca Yuhuudda ee Orthodox-ka ah
- Golaha Hackney
- HASGA
- Ururrada Ganacsiga (NUT, NASUWT, NAHT, ATL, GMB & UNISON)

Lifaaqa 2

Wax soo saarka

2003 % KS1 Heerka 2 ama ka kor


Iskuulka	Imtixaanka Akhrinta	Imtixaanka Qoridda	Imtixaanka Xisaabta	Qiimeynta Sayniska
Amherst	41.4	35.7	55.7	52.9
Baden Powell	79.3	79.3	86.2	79.3
Benthal Infants	57.6	72.9	77.9	74.6
Berger	71.7	66.7	81.7	75
Colvestone	60.7	67.9	71.4	82.1
De Beauvoir	55.8	51.2	76.7	69.8
Gayhurst	70.8	70.8	86.1	81.9
Grasmere	86.6	83.3	86.6	96.6
Holmleigh	63.3	33.3	86.7	93.3
Holy Trinity	72.4	65.5	96.6	68.9
Lauriston	100	86.7	100	93.3
London Fields	56.1	63.2	77.2	68.4
Mandeville	60	46.7	68.8	97.8
Millfields	60.3	61.6	71.2	72.6
Morningside	57.6	49.2	76.3	93.2
Nightingale	53.6	64.3	89.3	64.3
Northwold	88.1	84.7	86.4	86.4
Orchard	72.4	56.9	87.9	72.4
Our Lady & St Joseph	90.3	90.3	93.5	100
Princess May	43.4	37.7	77.4	58.5
Rushmore	91.6	88.3	95	96.7
Shacklewell	68.5	64.8	72.2	68.5
St Dominics	96.6	96.6	98.3	98.3
St John & St James	73.3	76.7	93.3	96.7
St Mary's	88.5	69.2	100	92.3
St Matthias	93.1	100	96.6	79.3
St Pauls with St Michaels	87.5	79.2	91.7	91.7
St Scholasticas	78.1	62.5	96.9	93.8
Tyssen	55	45	75	97.5
Whitmore	67.3	49.1	76.4	69.1
William Patten	70.2	66.7	78.9	80.7

2003 KS2 Heerka 4 % loogu talagalay dhammaan iskuullada ku yaal masaafada 1 mayl ee Amherst

	Ingiriis	Xisaab	Saynis	Cel Celiska dhibcaha
	<u>L4+</u>	<u>L4+</u>	<u>L4+</u>	score
England Average	75%	73%	87%	27.4
Dugsiga Hoose Amherstl	27%	26%	44%	21.7
Dugsiga Hoose Gayhurst	66%	61%	81%	26.2
Dugsiga Hoose Colvestone	97%	70%	87%	26.5
Dugsiga Hoose Shacklewell	69%	71%	95%	26.6
Holy Trinity Church of England...	83%	86%	97%	28.6
St John and St James CofE Prim...	85%	85%	100%	28.6
Dugsiga Hoose Morningside	50%	53%	66%	25
Dugsiga Hoose Nightingale	59%	63%	74%	25
Iskuulka Baden-Powell	72%	72%	93%	27
Iskuulka Benthall Junior I	80%	58%	84%	26.4
Dugsiga Hoose De Beauvoir	62%	62%	79%	25.7
St Scholastica Roman Catholic ...	68%	54%	86%	25.6
Iskuulka Mujtamaca Millfields	83%	77%	86%	27.5
Dugsiga Hoose Princess May	50%	31%	59%	23.1
St Jude and St Paul's CofE Pri...	73%	73%	87%	27.5
Our Lady and St Joseph Roman C...	79%	64%	89%	27.1
St Paul's with St Michael's Pr...	90%	79%	93%	27.4
St Matthias Church of England ...	71%	58%	66%	25.4
Dugsiga Hoose Berger	58%	60%	75%	25.2
Dugsiga Hoose London Fields	56%	48%	63%	24.6
Dugsiga Hoose Orchard	50%	52%	62%	24.1
Dugsiga Hoose Rushmore	74%	79%	83%	28.6
St John of Jerusalem Church of...	88%	76%	92%	28.1
Dugsiga Hoose Newington Green	78%	57%	74%	25.9
Dugsiga Hoose Northwold	62%	54%	58%	24.8
Dugsiga Hoose St Dominics RC P	63%	57%	78%	25.5
Dugsiga Hoose Grasmere	86%	76%	90%	27.8
Dugsiga Hoose William Patten	75%	63%	79%	26.5
IskuulkaLauriston	87%	87%	87%	29.7
Dugsiga Hoose Mandeville	48%	31%	48%	22.8
St Mary's Church of England Pr...	96%	96%	100%	28.9
Dugsiga Hoose Whitmore	67%	55%	80%	26.3

Iskuullada ku qoran farta jalleecda Deegaanka way ka baxsan yihiin.

Amherst Primary School: Improvement Measure



Cabbirka Hagaajinta

Iskool

LEA-da Hackney”

England”

Lifaaqa 3: Boosaska Iskuulka ee ka jira Goobta Qorsheynta 4

PA 4 – Bartamaha Hackney	Jannaayo 2004 Lambarrada Wareega (marka laga reebo Boosaska Xannaanada)	Baaxadda Oggolaanshada La Qorsheeye	Oggolaanshada La Qorsheeyey ee Boosaska Siyaadada ah	Oggolaanshada La Qorsheeyey ee Boosaska % Siyaadada ah
Amherst	428	525	97	18.5%
Baden Powell	212	210	0	0%
Benthal I	175	180	5	2%
Benthal J	220	240	20	8%
Colvestone	205	210	5	2%
Nightingale	186	210	24	11.4%
Shacklewell	368	420	52	12.3%
Isugeyn	1794	1,995	203	10.2%
		Isu geynta Oggolaanshada La Qorsheeyey	Isugeynta Boosaska Siyaadada ah	
In ka yar 0.5 fe	1794	1890	96	5.1%
U dhow Amherst	1794	1470	(324)	(22%)

Yareynta la qorsheeyey ee qaadashada Amherst, marka laga eego soo jeedinta Billow Cusub, waxaan yareyneynaa lambarka boosaska siyaadada ah ee ku jira Goobta Qorsheynta 4 ilaa iyo 5.1%, taasoo ah mid ku kooban xaddi la aqbali karo oo loogu talagalay is beddellada shacabka ee la filayo.

Xiridda iskuulku waxay keeni doontaa farqi ah 22% oo boosas, kuwaasoo aan ahaanayn kuwo tartan geli kara, ama Hay'adda u oggolaan kareysa iney ka soo baxdo waajibaadyadeeda.

If you would like to find out what this document says please put a tick in the box and put your name, address and phone number at the bottom of this page and return it to the address below.

Bu belgenin içeriğinin açıklamasını istiyorsanız lütfen bu kutuyu işaretleyin, adınızı, adresinizi ve telefon numaranızı bu sayfanın altındaki boş yerlere yazın, ve sayfayı aşağıdaki adrese gönderin. (Turkish)

Haddii aad jeceshahay in aad ogaato waxa warqadan laguugu sheegaayo, Fadlan waxa aad calaamadisaa Sanduuqan oo waxa aad Magacaaga, Adirayskaaga iyo Telifoon Lambarkaaga aad ku qortaa xagga hoose ee boggan, oo ku soo celi markaa Adirayskan xagga hoose ku qoran. (Somali)

如果你想知道這份文件的詳細內容，請在格子里 剔一下。在本頁下面寫下你的名字，地址和電話號碼并寄到下面的地址。(Chinese)

Nếu quý vị muốn tìm hiểu tài liệu này nói điều gì xin đánh dấu vào ô và ghi tên, địa chỉ và số điện thoại của quý vị vào cuối trang này và gửi về địa chỉ dưới đây. (Vietnamese)

এই দলিলে কি লেখা আছে সে সম্পর্কে যদি আপনি জানতে চান অনুগ্রহ করে সাধের বাবুসে টিক দিন। তারপর পাতাটির নিচে আপনার নাম, ঠিকানা এবং টেলিফোন নাম্বার লিখে নিম্নলিখিত ঠিকানায় ফেরৎ পাঠান। (Bengali)

જો તમને આ દસ્તાવેજ શું જણાવે છે તે વિષે માહિતી જોઈતી હોય તો મહેરબાની કરીને બોક્સમાં નિશાની કરી અને આ પાનાના અંતમાં તમારું નામ, સરનામું અને ટેલિફોન નંબર આપી અને તેને નીચે સરનામે રવાના કરશો. (Gujerati)

ਜੇ ਤੁਸੀਂ ਜਾਣਨਾ ਚਾਹੁੰਦੇ ਹੋ ਕਿ ਇਹ ਦਸਤਾਵੇਜ਼ ਕੀ ਕਹਿੰਦਾ ਹੈ ਤਾਂ ਕਿਰਪਾ ਕਰਕੇ ਖਾਨੇ ਵਿਚ ਠੀਕਾ ਮਾਰੋ ਅਤੇ ਆਪਣਾ ਨਾਂ, ਪਤਾ ਅਤੇ ਫੋਨ ਨੰਬਰ ਇਸ ਪੰਨੇ ਦੇ ਬੱਲੇ ਲਿਖੋ ਅਤੇ ਇਸ ਨੂੰ ਹੇਠ ਦਿੱਤੇ ਪਤੇ 'ਤੇ ਵਾਪਸ ਭੇਜ ਦਿਓ। (Punjabi)

Si vous désirez connaître le contenu de ce document, veuillez cocher la case et indiquer votre nom, adresse et numéro de téléphone au bas de cette page et la renvoyer à l'adresse indiquée ci-dessous: (Français)

Si desea saber de lo que trata este documento, ponga una señal en el recuadro y escriba su nombre, dirección y número de teléfono al final de esta página y envíela a la dirección que se indica abajo. (Spanish)

اگر آپ یہ جاننا چاہتے ہیں کہ دستاویز میں کیا لکھا ہے تو اوزارہ کرم باکس میں ایک صحیح کا نشان لگائیے اور اپنا نام، پتہ اور فون نمبر اس صلوٰۃ کے نیچے لکھیے اور اسے نیچے دیئے گئے پتے پر واپس بھیج دیجئے۔ (Urdu)

Haddii aad jeceshahay inaad ogaatid waxa uu dukumentigaanu sheegayo fadlan xarriiq sanduuqa gudahiisa ka dibna magacaaga, cinwaankaaga iyo lambarka telefoonkaaga ku qor meesha ugu hooseysa boggaan kuna soo celi cinwaanka hoose

Foomka Jawaabta Wada Tashiga

Billow Cusub oo loogu talagalay Dugsiga Hoose ee Amherst

Fadlan ku soo celi **Lyn Baran** markay tahay **30 Juun 2004** goobta:

The Learning Trust
Hackney Technology
and Learning Centre
1 Reading Lane
London
E8 1GQ

Lambarka faakiska: 0208 820 7516
Email: lyn.baran@learningtrust.co.uk
Telefoon: 020 8820 7183 or 7629

Jawaabta ku aaddan wada tashiga

Magaca qofka
Jawaabaya

Danta laga leeyahay
Iskuulka Amherst
tusaale waalid, macallin
xubin mujtamac

waxaan oggolahay in Billow Cusub oo loogu talagalay Iskuulka Amherst la raaco.

Waan ku raacsanahay

Kuma raacsani

(fadlan sanduuqa gudahiisa xarriiq)

Fadlan in badan meeha hoose uga faalloo haddii aad dooneysid. Ku sii wad bogga kale haddii aad u sii baahan tahay.

Wixii kale ee faallo ah:

Waxaa laga yaabaa inaad elektarooni ahaan u soo jawaabtid, haddii aad galaangal u leedahay internet.
Booqo www.learningtrust.co.uk ka dibna eeg hoosta Daabacaadaha/Wada Tashiga.

Waad ku mahadsan tahay jawaabtaada.